

[somali]

[Fornavn Etternavn]

[Gateadresse]

[Postnr Poststed]

Deres ref.:

Vår ref.:

Dato:

Miyuu caabuq (infakshan) kaaga dhacay meeshii lagaa qalay?

_____ [Region/HF] Waxa ay si joogto ah u baadhaa inta qof ee la qalay ee uu caabuq kaga dhacay meesha nabarka laga qalay ka dib marka laga fasaxo /lagu daaweeyo isbitaalayada. Waxa aanu xidhiidhkan kuula soo samaynaynaa maadaama lagugu qalay _____ [operasjonsdato] isbitaalka _____ [Navn på sykehus]. Aad ayaanu ugu farxi lahayn oo mahad kaaga celinaynaa haddii aad nooga soo jawaabto su'aalahan marka 30 maalmood laga joogo qalitaanka. Foomka waxa aad ku soo diraysaa galka halkan ku lifaaqan, jawaabtana waad soo celinaysaa xataa haddii aanu meeshii nabarka ka muuqan wax caabuq ahi.

Miyuu meeshii lagaa qalay galay dheecaan leh midab jaalle-cagaar ahi?

Haa May

Miyaad ku aragtay midab guduudan oo aan caadi ahayn agagaarka nabarka (in ka badan ½ cm hareer kasta)?

Haa May

Miyuu dhakhtar dib u jeexay nabarka caabuq awgii?

Haa May

Miyaa lagu siiyey daawo antibiyuutik ah caabuq nabarka ah awgii?

Haa May

Miyaad yeelatay qandho (ka sarraysa 38,5 derejo) caabuq ku dhashay goobta lagaa qalay awgeed?

Haa May

Taariikhda goorta aad ogaatay caabuqa haddii uu jiro: _____

Taariikh/Saxiix _____ -- _____

Haddii aad kaga jawaabtay "haa" mid ka mid ah su'aalaha, waxa muuqanaysa in uu kaaga dhacay caabuq goobtii lagaa qalay.

Waxa aanu markaa kaa codsanaynaa in aad la xidhiidho dhakhtarkaaga oo aad sii qaadato warqaddan. Dhakhtarku waxa uu buuxinayaa su'aalaha ku xusan bogga 2.aad, marka uu buuxiyo ka dibna waad noo soo diraysaa adiga oo ku soo ridaya boqshadda ku lifaaqan halkan.

Warbixinta aanu kaa hello waa la ilaalinayaa oo cid kale u gudbi mayso.

Haddii aad qabto su'aalo arrintan la xidhiidha waxa aad la xidhiidhi kartaa

_____ [tittel] _____ [kontaktperson]
taleefanka _____

Salaan diirran

[Hygienesykepleier/seksjon for sykehushygiene]

Madaxa waaxda

ROG